

## CAAWIMAAD LACAGEED MACLUUMAADKA WAALIDIINTA

Ilmo kasta oo Victoria ah waa inuu helaa fursadaha waxbarasho ee adduunka ka jira kana baxsan fasalka dhexdiisa. Kambooyinka, cayaaraha iyo Dibad-baxyada (The Camps, Sports and Excursions Fund) waxay ka caawisaa inay hubiso inaan ardayna gefin fursadda inay kala qaybgalaan ardayda ay isku fasalka yihiin nashaadyada waxbarasho oo muhiimka ah oo fankana ah. Waxayna qayb ka tahay ka-dhigidda Victoria Dowladgoboleedka Waxbarasho iyo ballan-qaadka dowladda ee jebinta xiriirka u-dhaxeeyaa asalka ardayga iyo natijjooyinkooda.

### LACAGTA KAAMBADA, CIYAARAHAA & DIBAD-BAXA (CSEF)

Kaambada dugsiyada waxay carruurta siisaa waayoaragnimooyin xiiso leh oo laga sameeyo dibad-baxyada, waxay dhiirigelisaa faham weyn ee sida adduunku u shaqeyeo cayaaruuhuna waxay baraan koox-u-wada-shaqaynta, anshaxa iyo hoggaaminta. Dhammaan waxay qayb ka yihiin manhajka caafimaadka leh.

CSEF waxaa bixin doona Dowladda Victoria si loo caawiyo qoysaska u xaq leh si looga daboolo qarashyada safarada dugsiga, nashaadyada kaambooyinka iyo cayaaraha.

Haddii aad haysato karaka ka-dhaafka oo dhaqaale ahaan la hubiyey ama aad tahay waalid xannaaneeye ku-meel-gaar ah, Waxaad xaq u yeelan kartaa CSEF. Qaybta tixgelinta gaarka ah ayaa kaloo u jirta magangalyo-doонка iyo qoysaska qaxootiga ah. Gunnada Waxaa la siiyaa dugsiga si loogu adeegsado qarashyada la xiriira nashaayada kaambooyinka, dibad-baxyada ama cayaaraha oo faai'do ugu jirto ilmahaaga.

Qadarka lacageed ee CSEF sannadkii halkii ardayba waa:

- \$125 ee ardayda dugsiga hoose
- \$225 ee ardayda dugsiga sare

### SIDA LOO CODSADO

La xiriir xafiiska dugsiga si aad u hesho foomka codsiga CSEF ama ka soo degso [www.education.vic.gov.au/csef](http://www.education.vic.gov.au/csef)

### MACLUUMAAD DHEERAAD AH

Codsiga CSEF taariikhaha uu xidhmayo iyo macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan lacagta ka eeg [www.education.vic.gov.au/csef](http://www.education.vic.gov.au/csef)

